

QIIMAHA XANAANADA CARUURA IYO CAAWINAADA DHAQAALAHA

Maxay tahay qarashka Xanaanada Caruurta ee degaankayga?

U isticmaal shaxdan si aad ku ogaato qiimaha xanaanada caruurta ee meesha aad ku nooshahay. Qiimaha halkaan ku yaal waa qiimaha caadigaa ee hal sitimaan ee waqti buuxa xananayteeda, hasa ahaatee, waa inaad filataa qiimo aad u kala duwan.

- ▶ [Xarumaha Xanaanaynta Caruurta ee King County](#)

Sidee ayaan ku helaa caawinaad aan isaga bixiyo?

- ▶ Sidee ayaan caawinaad uga helaa magaalada Seattle?
- ▶ Sidee ayaan caawinaad uga helaa King County?
- ▶ Waa sidee hadii aah guri la'aan ahay?
- ▶ Sidee ayaan caawinaad uga helaa DSHS?
- ▶ Waa sidee haddii aan ku noolahay magaalada Redmond?
Sharuucda lacagta caawinaada ee magaalada Redmond (Acrobat)
Codisga Lacagta caawinaada ee magaalada Redmond (Acrobat)

Magaalada Seattle, King County, Magaalada Redmond, iyo DSHS waxay ka caawiyaaan qoysaska daqliga yar sidii ay isaga bixin lahaayeen xanaanada caruurta. Markii aad u baahan tahay inaad shaqeyso ama aad ku jirto barnaamijka tababar la ogolaaday iyo aad soo buxiso sharuudaha daqliga si aad ku hesho caawinaad. Qoysaska aan lahayn guri joogta ahina waxay xaq u leeyihiin inay caawinaad qaas ah ka helaan King County.

Sidee ayaan caawinaad uga helaa magaalada Seattle?

Si aad uga hesho caawinaad barnaamijka waa inaad ku nooshahay xaduuda magaalada Seattle, iyo soo buuxiso sharuudahooda kale, Barnaamijku waxa uu u shaqeeya ilmaha ay da'doodu tahay inta u dhaxaysa hal bil ilaa iyo 12-jirka. Qoysasku waxay dooran karaan 160 Xanaanadood oo caruurta guryaha lagu hayaa iyo xarumo oo ku kala yaal King County oo heshiis la leh magaalada. Waxaa laga yaaba in barnaamijka uu leeyahay sugitaan.

Si aad ku codsato: Wac (206) 386-1050 Waqtiga shaqada caadiga
Website: <http://www.cityofseattle.net/hsd/ChildCareSubsidies/Default.htm>

Sidee ayaan caawinaad uga helaa King County?

Si aad caawinaad uga hesho Barnaamijka King County Waxa qasaba inaad ku nooshahay King County iyo banaanka magaalada Seattle. Barnaamijku waxa uu u shaqeeya ilmaha ay da'doodu isugu jirto inta u dhaxaysa hal bil iyo 12-jirka. Qoysaska xaqa u lihi waxay kala dooran karaan Guryaha xaanaynta caruurta iyo xarumaha King County. Waxa laga yaaba in uu jiro waqti sugitaan ah barnaamijka. **FADLAN LA SOCO: SABABTOO AH JARITAAN QARASHYADA, KING COUNTY HADA MA AY AQBALAYAAN CODSIYO CUSUB WAQTIGAN XAADIRKA. QARASHYADA QAARKOOD AYAA WAXA LAGA YAABA INY DIYAAR NOQDAAN 2002 QOYSASKA KU NOOL DHULKA AAN KU SOO DARSAMIN EE KING COUNTY (KUWA AAN KU NOLAYAN MAGAALADA DHAXDEEDA).**

- ▶ Si aad ku codsato Wac: (206) 296-1362 waqtiga shaqada caadiga, ama
- ▶ Web Site: <http://www.metrokc.gov/dchs/csd/ChildCare/Subsidy.htm>

Waa sidee haddii aan guri la'aan ahay?

King County waxay la shaqeeyaan isku xirka guryaha si ay caawinaad ugu fidiyaan qoysaska ilmaha leh ee ilmaha ay da'doodu u dhaxayso hal bil ilaa 12 jir.

Si aad xaq ugu yeelato, Qoysku waa inuusan heysan meel u go'an oo ay degan yihiin ama aysan ku noolayn guri ku meel gaar ah. Midaano ay ku jiraan hoteelada welferka, guryaha domestic violansiga, guryaha kaniisadaha, iyo guryaha ku mel gaarka ah.

- ▶ Si aad ku codsato wac: (206) 296-1362 waqtiga shaqada caadiga, ama
- ▶ Web Site: <http://www.metrokc.gov/dchs/csd/ChildCare/Subsidy.htm>

Sidee caawinaad uga helaa DSHS?

Si aad ku hesho caawinada DSHS, waxa qasaba inaad soo buuxiso sharuudaha daqliga iyo shaqeyso ugu yaraan tiro saacado ah. Waxaa jira dhowr xafiis oo ku kala yaal King County. Si aad ku ogaato inaad xaq u leedahay iyo lambarka xafiiska kugu dhow waxaad wacdaa 1-877-980-9131. Waxaad ka buuxin kartaa codsiga Online.

<http://www.wa.gov/workfirst/workingfamilies>

Waa sidee haddii aan ku noolahay Magaalada Redmond?

Magaalada Redmond waxay bixisaa iskoolarship lagu bixiyo xanaanada caruurta ee waalidka soo buuxiyay sharuuda daqliga oo ku nool xaduudka magaalada Redmond. Si aad ku ogaato haddii aad soo buuxin kartid sharuudaha iskoolarshipka, fadlan soo wac 206-329-1011 ext. 215.

[Sharuudaha Iskoolarshipka Magaalada Redmond \(Acrobat\)](#)

[Codsiga Iskoolarshipka Magaalada Redmond \(Acrobat\)](#)

Warar dheeraada & Ku xiritaan

▶ [Ka bixinta Dhaqaalaha](#)